

# Hagahaaga ku aadan TRURAPI® ▼

Insulin aspart 100 halbeeg/mL

Buug-yarahan waxaa loogu talalgalay dadka qaba cudurka sonkorowga ee loo soo qoray Trurapi®.

SANOFI

# Tusmada


Waa maxay Trurapi®? 3

Isticmaalka Trurapi® 4

Sideen u isticmaalaa insulintayda? 5

Waxyeelooyinka gaarka ee suurtagalka ah & maareyntooda 8

Daawooyinka kale iyo Trurapi® 10

Qaar ka mid ah xiriirada ee lagu yaabo inay waxtar kuu yeeshaan 11

Xiriiradayda 12

Qoraallo 13


Buug-yarahan waxaa loogu talagalay inuu kaa caawiyo isticmaalka Trurapi®. Waxaa loogu talagalay gebi ahaanba inuu kabo talada uu ku siiyo dhakhtarkaaga ama kalkaaliyahaaga caafimaad oo bedel uma ahan buug-yaha macluumaadka bukaanka, sidaas darteed fadlan isla akhri labada buug.

# Waa maxay Trurapi®?

## Waxaa laguu qoray Trurapi®, oo ah dawo kaa caawin doonta inaad xakameyso heerka sonkorta dhiigaaga xilliyada cuntada.

Trurapi® waa nooc dhakhso u falcelisa oo ka mid ah insulinta. Waxaa la qaadan karaa waxyar kahor ama waxyar kadib markaad cunto cuntada si ay gacan uga geysato maaraynta heerarka sonkorta (gulukooska) ee jirka ee dadka waaweyn iyo carruurta da'doodu tahay 1 sano iyo wixii ka sarreeya kuwaas oo qaba Nooca 1aad ama Nooca 2aad ee sonkorowga.

Maadaama heerarka gulukoosta dhiiggu ay kacaan ka dib markii la cuno cuntada, xammeetidu caadi ahaan waxay soo saartaa nooc si dhakhso leh 'u fida' oo insulin ah si ay heerarka gulukoosta dhiigga ugu soo celiso heerka caadiga ah. Trurapi® si dhakhso leh ayay shaqeeysaa laakiin waqti gaaban oo kaliya ah si ay isugu ekeysiiso insulin-taan dilaacday.



# Isticmaalka Trurapi®

Trurapi® waxaa lagu heli karaa iyadoo kujirta qalimaan la tuuri karo oo horay loo buuxiyay iyo keydadka lagu isticmaali karo qalin dib loo isticmaali karo. Kalkaaliyahaaga caafimaad ama takhtarkaaga cudurka sonkorowga waa inuu kaala hadlaa xulashooyinkaan kugu habboon adiga iyo sida loo isticmaalo.

Macluumaadka ku jira qaybtaan ayaa kaa caawin doona inaad ku ilaaliso insulin-taada xaalad wanaagsan adigoo si sax ah u keydinaya.

## Hubi taariikhda dhicitaanka

Kahor intaadan isticmaalin Trurapi®, markasta hubi astaanta daawada si aad u xaqiijiso inaad haysato insuliinta saxda ah iyo inaysan dhaafin taariikhda dhicitaanka. Taariikhda dhicitaanka waxay ku qoran tahay qalinka dushiisa, weelka keydka daawada ama dhalada iyo kartoonka korkiisa.

## Irbada saxda ah ee laguugu talagalay


Qalabkaaga SoloSTAR® ama qalabka kaydadka waxaa lagu isticmaali karaa irbado la iska tuuri karo oo kala duwan. Irbidaha waa yaryar yihiin si loo yareeyo raaxo darada ay kuu keeni karaan. Dhakhtarkaaga ama kalkaaliyahaaga caafimaad ayaa kuu doori doona irbadda saxda ah ee adiga kugu habboon.

# Sideen u isticmaalaa insulintayda?

Trurapi® waa dareere cad oo ay tahay in la isku duro waxyar kahor intaan la cunin cuntada ama waxyar kadib cuntada.

Waxaa lagama maarmaan ah in la hubiyo inaad isticmaaleyso insulin-ta saxda ah mar kasta oo aad isku durayso. Kalkaaliyahaaga caafimaad ama takhtarkaaga cudurka sonkorowga ayaa kaala hadli doona sida iyo meesha ay tahay inaad iskugu durto insulin-taada. Waxay kaa caawin doonaan wax ka bedelka qiyaasta/dooska si ku haboon baahiyahaaga.

**Badanaa waxaa lagugula talinayaa inaad iska durto meelahaan soo socda:**




Trurapi® waxaa loogu talaalay maqaarka hoostiisa in lagu duro. Waa inaadan waligaa iskaga durin si toos ah xidid ama muruq. Trurapi® waxay ku habboon tahay oo keliya in maqaarka hoostiisa lagu duro. La hadal dhakhtarkaaga haddii aad u baahan tahay inaad qaab kale iskugu durto insulin-taada.

Duritaan kasta, beddel goobta aad iska durayso ee aagga gaarka ah ee maqaarka aad isticmaasho. Tani waxay yareyn kartaa khatarta ah inay kaa soo baxaan buurbuur ama maqaarka oo daloola. Meelaha ugu fiican ee aad iskaga duri karto waa: xagga hore ee dhexda (caloosha), gacanta kore ama bowdadaada hore. Insulin-ta ayaa si dhakhso leh u shaqeyn doonta haddii aad ku durto xagga hore ee dhexda (caloosha). Waa inaad had iyo jeer si joogto ah u cabirtaa sonkorta dhiigaaga.

## Weelka keydadka daawada

Kalkaaliyahaaga caafimaad ama takhtarkaaga cudurka sonkorowga waa inuu kaala hadlaa qalimaanta kugu habboon adiga iyo sida loo isticmaalo.

Weelasha keydka daawada waxay ka kooban yihiin 3ml oo dareere ah waxaana la gelin karaa qalinta dib loo isticmaali karo ee AllStar®PRO ama qalinka dib loo isticmaali karo JuniorStar®.

Kahor intaadan isticmaalin markii ugu horaysa, weelasha keydka ee daawada Trurapi® waa in lagu kaydiyaa kartoonadooda iyagoo la gelinayo firinjeer in u dhexeeysa 2°C iyo 8°C. Waa inaan la barafayn waana in laga ilaaliyaa kuleylka iyo iftiinka tooska ah.

Kahor intaadan kaydadka daawada gelinin qalinka insulin-taada, ku hay heerkulka caadiga ah ilaa saacad ama laba saacadood si ay wax yar u kululaato. Hubi si aad u xaqiijiso in weelka kaydka uu yahay sidiisa iyo in dareeraha uu u muuqdo mid saafi ah oo aan lahayn walxo adag.

Markii aad isticmaalaysid, qalinkaaga aad gelisay weelka keydka daawada dib ha u gelinin firinjeerka ama ha dhigin meel heerkulkeeda ka sareysa 30°C laakiin ku hay kartoonkooda si aad uga ilaaliso iftiinka. Mar haddii la furo, insulintaada waxaa la isticmaali karaa oo keliya illaa 28 maalmood. Sidaas darteed, taariikhda isticmaalka ku qor xagga sumada si ay kaaga caawiso inaad xasuusato oo aad iskaga tuurto insulin-ta ku hartay kartoonka afar toddobaad kadib.

Qalimaanta AllStar®PRO iyo JuniorStar® ayaa laga heli karaa rugta caafimaadka ee cudurka sonkorowga.

Tilmaamaha ku saabsan sida loo isticmaalo qalimaanta AllStar®PRO iyo JuniorStar® ayaa laga heli karaa Buug-yaraha Macluumaadka Bukaanka ee ku jira kartoonka.






## Qalimaanta horay loo buuxiyey

Qalimaanta la iska tuuri karo ee SoloSTAR® waxaa ku jira 'halbeegyada' Trurapi®. Kahor intaadan isticmaalin marka ugu horeysa, qalimaantaada ku keydi kartoonkooda kore adigoo gelinaya meel qabow, sida firinjeerka. Barafaynta waxay dhaawici doontaa insulin-ta sidaas darteed ka fogeey qaybta barafaynta ee firinjeerka ama inaad geliso meel ay daawada ku barafooweyso.

Markaad qalin cusub kala soo baxdo firinjeerka, ku hay heerkulka caadiga ah ill saacad ama laba saacadood si uu u kululaado wax yar ka hor intaadan isticmaalin. Markaad qalin kala soo baxdo firinjeerka si aad u isticmaasho, ama kaab ahaan aad ugu isticmaasho, waxaa la isticmaali karaa ilaa 28 maalmood. Inta lagu jiro waqtigan, dib ha ugu celin firinjeerka; ku hay heerkulka caadiga ah laakiin aan ka kululayn 30˚C. Xusuusnow inaadan meelna uga tagin waayo way kululaan kartaa oo xaqiiji inaad ka ilaaliso iftiinka.

28 maalmood kadib, iska tuur qalinka SoloSTAR® aad isticmaaleyso, xitaa haddii ay weli ku jiraan insulin, oo bilow inaad isticmaasho qalin cusub. Ha isticmaalin qalimaanta SoloSTAR® wixii ka dambeeya taariikhda dhicitaanka ee lagu daabacay astaanta qalinka ama kartoonka.

Tilmaamaha ku saabsan sida loo isticmaalo qalinka SoloSTAR® ee la tuuri karo ayaa laga heli karaa Buug-yaraha Macluumaadka Bukaanka ee ku jira kartoonka.



# Waxyeelooyinka gaarka ah & maareyntooda

Si la mid ah dhamaan daawooyinka, Trurapi® waxay sababi kartaa waxyeelooyin gaar ah Waa muhiim in laga warhayo waxyeelooyinkaas. Si aad u hesho liiska buuxa ee waxyeelooyinka gaarka ah, fadlan akhri Buug-yaraha Macluumaadka Bukaanka. Haddii aad wax su'aalo ah ka qabtid waxyeellooyinka gaarka ah, la hadal dhakhtarkaaga ama kalkaalisada caafimaadka.

## Waxyeellooyinka gaarka ah ee suurtagalka ah

Hypoglycaemia (sonkorta dhiiga oo yaraato)
Haddii aad qaadanayso daawada Trurapi® had iyo jeer waxaa jira fursad ah in aad yeelato heerka sonkorta dhiiga oo yeraada (a "hypo"). Tani waxay dhacdaa marka heerarka gulukoosta dhiiggaagu ay aad u hooseeyaan oo ay aad u yar tahay gulukoosta dhiiggaaga ku jira marka loo barbardhigo inta uu jirkaaga u baahan yahay.

Dhakhtarkaaga ama kalkaaliyahaaga caafimaad ayaa kuu sharxi doona sida aad ku garan karto calaamadaha 'hypoglycaemia' iyo sida loo saxo heerarka gulukoosta dhiiggaaga (eeg bogga xiga si aad u hesho wixii macluumaad dheeraad ah).

## Calaamadaha xaalada 'hypoglycaemia'

Kuwaas waxaa ka mid noqon kara:

- Dhidid, gariir, neerfooso, dareemid suuxdin, dareemid gaajo, wadno xanuun

Haddii aad isku aragto mid ka mid ah calaamadahan, waxaa muhiim kuu ah inaad kala hadasho arrimahan dhakhtarkaaga ama kalkaaliyahaaga caafimaad oo aad marwalba tixraacdo talooyinka ay ku siiyaan.

## Maxaa la sameeyaa haddii aad isku aragto calaamadaha xaalada 'hypoglycaemia'?

Cun ama cab wax sonkor badan leh, sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogalka ah. Tani waxay kaa caawin doontaa sare u qaadista gulukoosta dhiiggaaga. Waxyaabaha soo socda waxaa laga helaa sonkor:

- Kiniiniyada gulukooska, casiirka khudradda, macmacaanka adag

Iska ilaali keega, buskudka iyo shukulaatada hadii ay suurta gal tahay
Cuntooyinkan waxay leeyihiin sokor badan, iyo sidoo kale dufan badan, sidaa darteed waxaa laga yaabaa inaysan si fiican u shaqeyn maxaa yeelay dufanka ayaa gaabis geliya in sonkorta ay jirka gasho.

Cabir heerarka gulukoosta dhiigga oo naso Haddii ay suurtagal tahay, waa inaad cabirtaa heerarka gulukoosta dhiiggaaga oo aad nasataa.

**Haddii calaamadaha xaalada 'hypoglycaemia' aysan kaa baabi'in 15-20 daqiiqadood kadib** Isticmaal xoogaa sonkor dheeraad ah. Mar alla markii aad ladnaan dareento, xaqiiji inaad u cuntid cuntooyinkaaga sidii caadiga ahayd si aad u ilaaliso heerarka gulukoosta dhiiggaaga.

### Calaamadaha xaaladaha daran ee 'hypoglycaemia'

Calaamadahan waxaa ka mid noqon kara kuwa soo socda:

- Dawakhaad, daal, madax xanuun, jahwareer, feejignaan la'aan, hadalka oo aan fasiix ahayn, aragga oo bedelma ama dabeecad lagu qaldi karo sakhraanimo

Haddii aad isku aragto mid ka mid ah calmaamadahan aadka u daran, raadso gargaar caafimaad isla markiiba.

# Waxyeellooyinka gaarka ah ee suurtagalka ah

**Isbeddelada ku yimaada meesha maqaarka laga durey**
Midaas ayaa dhici karta haddii aad insulinta ku durto hal meel marar badan. Unugyada dufanka ee maqaarka hoostiisa ku yaal ayaa laga yaabaa inay yaraadaan ama sii adkaadaan. Goobta la durayo waa in loo xogaa la maroojiyaa si looga hortago isbeddelada maqaarka sida burooyinka maqaarka hoostiisa kujira. Insuliintu waxaa laga yaabaa inaysan si fiican u shaqeyn haddii aad isku durto meel buurbuur leh. La xiriir dhakhtarkaaga haddii aad hadda iska durayso meel buurbuur ah kahor inta aadan billaabin inaad irbida ku durto aag kale. Dhakhtarkaaga ayaa laga yaabaa inuu kuu sheego inaad si dhow u hubiso heerka sonkorta dhiiggaaga oo aad hadba si waafaqsan wax uga bedesho insulin-taada ama qiyaasta aad ka qaadanayso daawooyinkaaga kale ee lidka ku ah cudurka sonkorowga.

**Falcelin Xasaasiyadeed oo Daran**
Raadso talobixin caafimaad isla markiiba haddii calaamadaha xasaasiyadda ay ku faafto qeybaha kala duwan ee jirkaaga ama haddii aad si lama filaan ah u dareento caafimaad darro, aad bilowdo dhidid, wareer, ay kugu adkaato neefsashada ama wadnaha oo dhaqso u garaacma, maadaama ay calaamadahani tilmaami karaan falcelin xasaasiyad oo aad u daran.

**Dareen-celinta Xasaasiyadda ee Gudaha ah**
Waxaad laga yaabaa inaad falcelin ka dareento goobta, iyo hareeraha, goobta la duray (sida casaan noqosho, xanuun aad dareento xilliga duritaanka, cuncun, finan, barar ama caabuq). Calaamadahan badanaa waxay baaba'aan dhowr toddobaad ka dib markaad isticmaasho insulintaada. Haddii aysan baabi'in, ama haddii ay ku faafaan jirkaaga oo dhan, isla markiiba la hadal dhakhtarkaaga.

# Daawooyinka kale iyo Trurapi®

U sheeg dhakhtarkaaga, farmashiistahaaga ama kalkaalisadaada caafimaad haddii aad qaadanaysid, ama aad dhowaan qaadatay ama laga yaabo inaad qaadato daawooyin kale. Daawooyinka qaarkood waxay beddeli karaan heerka sonkorta ee dhiiggaaga. Tani waxay ka dhigan tahay in qiyaasta/dooska insulin-ta ee aad qaadato ay isbedelayso Sidaas darteed, kahor intaadan qaadan daawo weydii dhakhtarkaaga haddii ay saameyn ku yeelanayso sonkorta dhiiggaaga iyo tallaabooyinka, haddii ay jiraan, aad u baahan tahay inaad qaaddo. Waxaad sidoo kale u baahan tahay inaad taxaddar sameyso markaad joojiso qaadashada daawada.





# Qaar ka mid ah xiriirada ee laga yaabo inay waxtar kuu yeeshaan

## Hay'ada Cudurka Sonkorowga ee UK

www.diabetes.org.uk
Taleefan: 0345 123 2399

## La Noolaanshaha Cudurka sonkorowga

DVLA
www.gov.uk/diabetes-driving
Taleefan: 0300 790 6806

## Nolol caafimaad leh

Caawimaada NHS ee joojinta sigaar cabista
www.smokefree.nhs.uk
Taleefan: 0300 123 1044

# Qaar ka mid ah xiriirada ee laga yaabo inay waxtar kuu yeeshaan

## Kalkaalisada sonkorowga

Magaca:

Taleefan:

## Dhaqtarka takhasuska u leh cudurka sokorowga

Magaca:

Taleefan:

## GP-ga

Magaca:

Taleefan:

## Dhaqtarka Nafaqada

Magaca:

Taleefan:

## Dhakhtarka Lugaha/Xanuunada lugaha

Magaca:

Taleefan:

## Kalkaalisada bulshada

Magaca:

Taleefan:

## Farmashiistaha

Magaca:

Taleefan:

## Qof kale

Magaca:

Taleefan:

# Qoraallo

# Qoraallo

# Qoraallo

Buug-yarahan waxaa loogu talalgalay dadka qaba cudurka sonkorowga ee loo soo qoray Trurapi®.

**Ka warbixinta waxyeelada:** Haddii aad la kulanto waxyeellooyin gaar ah, la hadal dhakhtarkaaga, farmashiistahaaga ama kalkaalisada caafimaadka. Kuwaas waxaa ku jira waxyeellooyin kasta oo suurtagal ah oo aan ku qornayn buugyaraha la socda xaashida. Sidoo kale waxaad si toos ah waxyeelooyinka gaarka u gudbin kartaa adigoo isticmaalaya Qorshaha Kaarka Jaalaha ah **www.yellowcard.mhra.gov.uk.**

Waxyeelooyinka gaar ah sidoo kale waa in lagu soo wargeliyaa Sanofi. Taleefan **0800 090 2314** ama iimayl u dir **UK-drugsafety@sanofi.com**

Markaad waxyeelooyinka gaarka soo gudbiso, waxaad gacan ka geysan kartaa bixinta macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan badbaadada daawadan.

▼Daawadani waxay u baahan tahay kormeer dheeraad ah. Tani waxay oggolaan doontaa in si dhakhso leh loo aqoonsado wixii macluumaad cusub ah ee la xiriira badbaadada.

Macluumaadka Caafimaad ee Sanofi: **08000 35 25 25**
Sanofi, 410 Thames Valley Park Drive, Reading, Berkshire, RG6 1PT

Taariikhda diyaarinta: Diseember 2021 | MAT-GB-2103279(v1.0)